

# Dib U Midow Qoys:

## Qaxootiga ama dadka la siiyey Dhowrista Bani-aadminimo.

---

Macluumaadka soo socda wuxuu kaa caawin doonaa inaad urursato warbixinaha iyo cadaymaha ugu badan ee suurtoogalka ah ka hor inta aanad u tagin la taliye sharci si aad ugala hadasho dib u midow qoys.

Haddii aad tahay **qaxooti** ama lagu siiyey **dhowris baniaadmino** aadna doonayso in xubin qoyskaaga ka mid ahi yimaad oo uu kugula noolaado UK, waxaad u baahan doontaa inaad cadayso arrimahan soo socda:

- Document. Inaad tahay qaxooti. Tusaale ahaan dokumentiga xaaladaada muhaajirnimada
- Inay ehelkaaga yihiin oo ay la noolaayeen qoyskaaga ka hor intii aanad ka tegin. Tusaale ahaan shahaadada guurka ama ta dhalashada/korsashada, sawiro qoys ama kuwo aroos.
- Inaad wali si joogto ah ula xidhiidho. Tusaale ahaan kaadhahka tilifoonka, waraaqo, risiidhka lacagta aad ugu dirto

### Xubinta qoyskaaga ee dibada ku maqani waa inuu/inay u cadeeyaa/saa safaarada UK::

- 1) Haddii ay nin/xaas/nin-nin/naag-naag qabta<sup>1</sup>
  - Inaad labaduba yihiin ama ka wayn yihiin 21 jir.
- 2) Haddii ay tahay ilmo (xataa kuwo la korsadey):
  - n isagu (iyadu) uu/ay ka yar tahay 18 jir aanu/aanay guursan una noolyahay (nooshahay) si madax banaan.

(Haddii ilmahaagu yahay 18 jir fadlan si dhaqso ah talo u raadso- waa inaad codsiga samaysaa ka hor 18 guurada dhalashadiisa)

- 3) Haddii ay tahay ehel kale
  - inay wali adiga kugu tiirsan yihiin, tusaale ahaan inaad lacag u dirto iyaga, ama inay kelidood yihiin ama inay da' wayn yihiin, ama inay yihiin qaraabo kuu dhow, and;
  - In xaalkoodu yahay 'daruuri iyo u damqasho'<sup>2</sup>. Taa macnaheedu waxaa weeyi inay dhibi haysto isla markaana ayna jirin cid kale oo wax taraysa

### Macluumaad kale oo muhim ah:

- Dokumenti kasta oo asal ah waa in loo turjumaa Ingiriisi
- Haddii xubinta qoyskaagu uu haysto baasaaboora ama aqoonsi waxay si wayn kaaga caawin doontaa codsigaaga.
- Xaalad noocee ah ayay imika ku nool yihiin? Yay la nool yihiin? Yaa taageera? Yaysan la'aantii noolaan Karin?

1 Aqoonsiga sharci ee dadka isku jinsiga ah ee xidhiidhka leh

2 Xigasho laga soo guuriyey laanta siyaasada ee Xafiiska Arimaha Gudaha loona guuriyey IAT, 29 june 2004

### Cadymaha loo baahan yahay si aad u buuxiso sharciga

Requirement of Rules	Examples of Evidence
Qaxootinimo ama dhowris bani-aadmino	Dokumentiga xaalada muhaajirnimo Dokumentigaaga socdaalka
Ehelka/Qayb qoyska ka mid ah	Shahaadada guurka Shahaadada korniinka/dhalashada ee ilmaha Sawiradaada qoyska ama arooska
Xidhiidh joogto ah	Kaadhadhka tilifoonka Waraaqo Risiidhka lacag dirista

### Yaa ku caawin kara?

Golaha Qaxootiga ee Iskotishka (Scottish Refugee Council) mar danbe ma bixinayaan khabiir iyo adeeg dib u midow qoys oo lacag la'aan ah. Hasea ahaatee Wakiilkaaga sharciga ayaa laga yaabaa inuu ku caawiyo.

Hadii aanad lahayn wakiil sharci ama aad jeclaan lahayd inaad bedesho waxaanu ku siin doonaa magacyada iyo ciwaanada wakiilo sharci.

Sida kor ku xusan, haddii aad doonayso inaad sahamiso arrintan, fadlan hubi inaad tixgelisay waxyaabaha la rabo iyo cadymaha lama huraanka u ah arintan ka hor inta aanad codsan.



**The Scottish Refugee Council** 5 Cadogan Square,  
(170 Blythwood Court) Glasgow G2 7PH  
**Talefon Tal oo Bilaash ah: 0800 085 6087**  
**Email:** [info@scottishrefugeecouncil.org.uk](mailto:info@scottishrefugeecouncil.org.uk)  
**Bogga Internetka:** [www.scottishrefugeecouncil.org.uk](http://www.scottishrefugeecouncil.org.uk)  
Lam. Sajilaada ee Samofalka No: SC008639

